

## **SOLJA**

### **SOMALILAND JOURNALISTS ASSOCIATION**

Behind Ex-UNICEF Office, Shacab Area Tel: +25263-4194200/+2522572604

E-mail: [soljajour@gmail.com](mailto:soljajour@gmail.com), Website: <http://www.ururkasolia.org> Hargeis, Somaliland

Ref: SOLJA/H/ -2016

Date: 26/03/016

## **War-saxaafadeed**

Ururka Suxufiyiinta Somaliland SOLJA isagoo dabaqaya Xeerka Saxaafadda Somaliland Xeer No:27/2004 qoddobadiisa 6 iyo 7aad oo si cad u qeexaya xaga muwaadiniitu ku heli karaan ruqsad warbaahineed, isla markaana ay ku cadahay dariiqa ay u marayaan shuruudaha looga baahan yahay, waxa uu arkaa caqabado badan oo ka taagan inay dadweynuhu nidaamkaasi maraan, kadib markii ay wasaaradda warfaafinta iyo xeer ilaalin tu si toos ah iyo si dadbanba u xayireen xuquuqda ruqsad helida furashada Hay'addo warbaahineed.

Ururka SOLJA waxa uu u arkaa xayiraada la saaray Wargeesyada kala ah Hubsad, Xog-ogaal, iyo Codka Shacabka oo ah sadex wargeys oo ruqsado sharci ah haysta balse dadkii ruqsadahaas lahaa ay siiyeen ama ka iibiyeen Suxufiyiin kale oo laga hor istaagay inay Ruqsado helaan, ka dib markii wasaaradda warfaafinta iyo Xeer ilaalin tu guud hakijeen si toos ah iyo si dadbanba Ruqsad bixinta Hay'addaha Warbaahinta ee cusub. Xukuumadda waxa aan ka codsanaynaa in ay dib ugu diiwaan geliso, isla markaana mulkiyada Wargeesyadaasi ku wareejiso Suxufiyiinta laga xayiray.

SOLJA waxay u aragtaa wasaaradda Warfaafinta oo ah Hay'adda maamusha Saxaafadda nidaamyadeeda kala duwan inaanay lahayn nidaam cad oo loo raaco xafiisyadii loo mari lahaa shuruuddaha diiwaangalinta, taasi-na ay sababtay in xukuumaddu ay uga dan leedahay inay Ruqsada u bixiso si aan toos ahayn oo ay siiso cidii ay u aragto dan.


SOLJA waxay xukuumadda Somaliland hore uga codsatay in arrintaas dib loo eego ama dacwadaha lagu soo oogay ay xukuumaddu si toos ah u wado si looga garnaqo isla markaana go'aan looga gaadho, maadaama ay saxaafaddu xaq u leedahay labada dariiq in midkood loo maro xayiraada saaran wargeesyadaasi.

Dhinaca kale, Ururka SOLJA waxa uu ugu baaqayaa Suxufiyiinta Somaliland ee doonaya inay furtaan ama la wareegaan hay'addo warbaahineed inay u maraan nidaamka sharciga ah ee uu

jidaynayo Xeerka Suxufiyiinta, kaasoo si cad u bayaaminaya helitaanka, wax ka bedelka iyo wax ku kordhinta hay'ad warbaahinta.

Ururka Suxufiyiinta Somaliland waxa suxufiyiinta kula talinayaan in ay joojiyaan baraha bulshada ee ay gaarka u leeyihiin inay ku baahiyaan dacaayadaha wax u dhimaya magacooda iyo ka saaxafaddaba, maadama oo aanu saxafigu la mid ahayn bulshada kale ee shaqsiga u istimaala baraha bulshada, kaas oo ku mutaysan kara Cizaab. Arrintaas cabashooyinka iyo Dacwadaha ka soo gaadhaya ururka ay aad u soo kordhayso isla markaana aad moodo Weriyayaashu inaanay ku baraarugsanayn dhibaatadda ay u keenayo arrintani.

Maxamuud Cabdi Jaamac



Guddoomiyaha Ururka Suxufiyiinta Somaliland SOLJA

